



## **Macluumaadka Kaalmada Xisaabta Canshuurta Cunugga (Child Tax Credit Helpful Information)**

Canshuurta Xisaabta Cunugga (Child Tax Credit) (CTC) ma aha xisaab cusub balse waxaa la baddalay 2021 - lacag badan ayaa la heli karaa iyo 90% kuwa xaqa u yeesha waxaa toos loo hormarin kara lacagaha.

### **Xaq u Yeelashada CTC**

- Haddii da'da cunugaada/caruurtaada u dhexeyso 0 ilaa 17 sanno (Si ay u qaataan, caruurta waa in ay leeyahiin nambarka Soshal Sekuritiga)
  - \$3,600 halkii cunug ay da'diisu u dhexeyso 0–5 sanno
  - \$3,000 halkii cunug ay da'diisu u dhexeyso 6–17 sanno
- Si aad u qaadatid Canshuurta Xisaabta Cunugga (CTC) oo buuxda, canshuur bixiyeyaasha ma soo geli karto in ka badan:
  - \$150,000 xagga canshuur bixiyeyaasha guursaday iyo ninka/naagta laga dhinta ee si wadajir ah u soo gudbiya canshuur celinta
  - \$112,500 xagga madaxa reerka
  - \$75,000 xagga dhamaan canshuur bixiyeyaasha
    - Kaddib marka xisaabta ka koreyso xisaabta canshuurta cunugga soo yaraato

### **Hormarinta lacagaha waxaa la bilaabi doonaa Luulyo**

IRS waxay ku hawlan tahay in ay horay u bixiso bar ka bar xisaabta kore laga bilaabo Luulyo 15, 2021.

Waxaad qaadan doontaa \$300 halkii bil halkii cunug oo xaq u yeesha iyo ku tiirsan oo jira 0-5 sanno (\$1,800 haddii uu ka weyn yahay 6 bil) ama \$250 halkii bil xagga cunug kasta oo xaq u yeesha iyo ku tiirsane jira 6-17 sanno (\$1,500 haddii uu ka weyn yahay 6 bil). Waxaad heli doontaa baaqiga lacagta marka ay soo gudbiyaan canshuurta sannadka 2022.

## **Sidee looga baxaa lacagta la bixiyo bil kasta**

Waxaad toos u heli doontaa xisaabta canshuurta cunugga bil ilaa bil haddii aad soo gudbisay canshuur celinta 2019 ama 2020, aadna sheegatay Canshuurta Xisaabta Cunugga ama aad IRS siisay macluumaadkooda adiga oo isticmaala brograamka Kuwa Aan-Soo Gudbinin (Non-Filers Tool) ee laga helo IRS.gov si aad u qaadatid lacagaha kixinta (stimulus payments). Haddii aad dooneysid in aad ka baxdid in aad qaadatid lacagta la bixiyo bil kasta ama in aad casriyeysid tirada caruurta adiga kugu tiirsan, waxaad isticmaali kartaa Xariirka IRS (IRS Portal) si aad u casriyeysid macluumaadkooda.

- <https://www.irs.gov/credits-deductions/child-tax-credit-update-portal>

## **Weli ma aadan soo gudbinin canshuurta 2020 ama lagaama rabo in aad soo gudbisid canshuurta 2021**

Toos ma u qaadan doontid bil ilaa bil xisaabta canshuurta cunugga (CTC) haddii...

- Aadan soo gudbinin canshuurta 2020, aan lagaa rabin in aad soo gudbisid canshuurta 2021, iyo ma aadan siinin IRS macluumaadkaada adigoo adeegsada brograamka Kicinta Kuwa Aan-Soo Gudbinin (Stimulus Non-Filers Tool).
  - Waxaad u baahan doontaa in aad isticmaashid [Brograamka Kuwa Aan Soo Gudbinin Canshuurta \(Non-Filers Tool\) ee cusub](#)
  - Ma u baahnid in aad samaysid sidaan haddii aad qaadatay jeegagga kicinta (stimulus checks). Haddii aad qaadatay jeegagga kicinta balse aad u baahan tahay in aad casriyeysid macluumaadkaada, waa in aad isticmaashid xariirka CTC IRS (<https://www.irs.gov/credits-deductions/child-tax-credit-update-portal>).

## **Helitaanka Diyaarinta Canshuurta iyo Kaalmada CTC**

Si aad u heshid adeegyada diyaarinta canshuurta oo lacag la'aan ah, booqo boggena [Goobaha Canshuurta \(Tax Sites\)](#) si aad u heshid macluumaad dheeraad ah.

Si aad u heshid kaalmo ama macluumaad badan oo ku saabsan CTC, fadlan la xariir Sahmiyaha Maaliyadda ee Xafiiska Xoojinta Maaliyadda Duqa Magaalada (Mayor's Office Financial Empowerment's Financial Navigators).

[Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan CTC!](#)

[Xayaysiinta Kaalmada Canshuurta Boston](#)

[Ilaha laga soo qaatay iskaashigena!](#)

Booqo [childtaxcredit.gov](http://childtaxcredit.gov) si aad u heshid macluumaad dheeraad ah!